

# Ogeysiinta Dadweynaha

## DIGNIINTA BIYAH A LA CABO

BAARINTAANKU WUXUU MUUJINAYAA IN AY KU JIRAAAN BAKTEERIYADA *E. COLI*



### BIYAHAN HA U ISTICMAALINA:

- Cabitaanka
- Diyaarinta Cuntada
- Samaynta Barafka
- Cadayashada Ilkaha
- Gacanta ku dhaqitaanka weelka

Hal ama in ka badan oo muunada biyaha ah ayaa natijadii muunada biyaha laga helay bakteeriyyada *E. coli* ilaha biyaha. Si loo ilaaliyo caafimaadka dadweynaha, Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH) waxay dejisay xaddidaadaha isticmaalka biyaha ee ku taxan liistada kore, ilaa iyo inta bakteeriyyada coliform ay jirto.

### Saamaynta Caafimaad ee Suurtagalka ah

- *E. coli* waa bakteeriya joogitaankeedu tilmaamayo in biyuhu ay ku wasakhoobeen saxarada dadka ama xoolaha. Cudur-sidhaa bini'aadamka ee qashinkaas ku jira ayaa waxay keeni karaan saamayn muddo gaaban ah sida shuban, casiraad, lallabbo, madax-xanuun, ama calaamado kale. Waxa laga yaabaa inay khatar caafimaad oo weyn u keenaan dhallaanka, carruurta yaryar, dadka da'da ah, iyo dadka hab-dhiskooda difaacu aad u liidato.

### Ka taxadar Gacmo-dhaqashada, Qubaysiga, iyo mayrashada

- Haddii biyaha aan la daawayn loo isticmaalin gacmo-dhaqashada, waa in la isticmaalo nadiifiyaha gacmaha ganaci ahaan loo sameeyo, looshin, ama kareem kadib marka la dhaqo gacmaha. Dhallaanka iyo carruurta yaryar waa in aysan ku qubaysanin biyo wasakhaysan, sababta oo ah waxa laga yaabaa in ay biyaha liqaan xilliga maydhashada.

### Talaabooyinka aanu Qaadayno

Ilaa inta dhibaatada wasakhowga laga saxayo, biyo nadiif ah oo la cabbo ayaa lagu bixinayaa meesha soo socota:

---

Intaa waxaa dheer, waxaan qaadeynaa tallaabooyinka soo socda si aan u hagaajino dhibaatada:

---

Haddii aad wax su'aalo ah qabto, la soo xiriir: \_\_\_\_\_

---

### Wixii macluumaad dheeraad ah

Waaxda Caafimaadka ee Minnesota  
651-201-4700  
[health.noncommunitycompliance@state.mn.us](mailto:health.noncommunitycompliance@state.mn.us)

## Tilmaamaha Ogeysiiska Dadweynaha

### Goorma ayaan isticmaalaa ogeysiiskan?

- Ku soo dhaji Ogeysiiskan Dadweynaha 24 saacadood gudahooda kadib marka aad hesho ogeysiinta natiijooyinka muunada biyaha oo muujinaysa in ay ku jirto bakteeriyyada *E. coli* ilaha biyaha.

### Sideen u isticmaalaa ogeysiiskan?

- Buuxi ogeysiiska adiga oo bixinaya maclumaadka soo socda:
  - Meesha laga heli karo biyo nadiif ah oo la cabbo;
  - Tallaabooyinka la qaadayo si loo saxo dhibaatada; iyo
  - Magaca iyo lambarka taleefanka qofka lagala xiriirayo nidaamka biyaha dadweynaha.
- Ku soo dhaji nuqullada Ogeysiiska Dadweynaha meelo muuqda ee dhammaan agagaarka nidaamka ilaha biyuhu u adeegaan.
- Goobaha cuntada iyo cabitaanku waa inay ku soo dhejiyaan ogeysiis meelaha laga soo galoo oo waa inay ku wargeliyaan macaamiisha in biyaha caagadaha loo isticmaalo dhammaan ujeedooyinka cuntada iyo cabitaanka.
- Dhismayaasha degaanka ahi waa inay ku dhejiyaan ogaysiis meelaha laga soo galayo oo waa inay ku wargaliyaan macaamiisha in biyaha caagadaha ee la cabbo loogu hayo qolalkooda.

### Muddo intee dhan ayaa la iiga baaahanyahay in uu ii dhajisnaado ogeysiisku?

- Ogeysiiska(yada) waa in ay meesha ku dhejisnaadaan ilaa baaritaanku ka xaqijinayo in bakteeriyyada total coliform aysan hadda ku jirin nidaamka biyaha.
- MDH ama hay'adda caafimaadka deegaankaaga ayaa kugu soo wargelin doonta marka ogeysiisyada aad fujin karto.

### Miyaa la iga rabaa in aan soo dhejiyo ogeysiiskan?

- Haa. Ogeysiinta dadweynaha ayaa looga baahan yahay jebinta heerarka biyaha la cabbo ee hoos yimaada sharciga Heerarka Sharciga Biyaha Cabbitaanka ee Badbaadada ah iyo Xeerarka Minnesota, cutubka 4720. Ku guuldareysiga in la soo dhajiyoo Ogeysiiska Dadweynaha ayaa waxay nidaamka ka dhigaysaa in ay ku xadgudubeen xeerarkan.
- Fadlan ogow in ogeysiiskan uu ka kooban yahay maclumaadka saamaynta caafimaad ee loo baahanyahay. Haddii aad doorato inaad wax ka beddesho ogeysiiska, marka hore la tasho sarkaalkaaga u hoggaansanaanta ee MDH.